



XAQIIQOQYINKA

WADA MARISTA

August 2016

WAA MAXAY QORSHAHA GUUD EE WADA MARISTA?

Waaxda Seattle ee Gaadiidka (Seattle Department of Transportation - SDOT) waxay cusboonaysiinaysaa Barmaaniijka WADA MARISTA (Pedestrian Master Plan -PMP). Waa qorshe howleedkeena labaatanka sanor aanu ka dhigayno wadooyinka Seattle meelo amaana ah, raaxo leh, oo ay dadka logaynaya ay ku socdaali/gooshi karaan da' kasta ha jireen amase awoodkasta oo ay leeyihiin.

Qorshahan waa la horumariyay iyadoo la tixgalinayo talooyinka dadka deegaanka, ganacsatada, iyo kuwa kale oo ka kala yimid guud ahaan Seattle.

QORSHAHA BALAARAN EE WADA LUGAYNTU WAXUU:

- Mudnaan siinaya meeshaanu ka dhisi doono dhabe amase dariiq cusub oo dadku ku lugeeyaan
- Tilmaano/Aqoonsano isgoysyada laga yaabo hagaajinta maristooda/goyntooda
- Sharaxaad sanduuqa fursadaha (qalabeed) waxaan u isticmaali doonaa si loo hagaajiyo lugaynta iyo helitaanka

WAXAANU MAQALNAY:

Waxaanu la xiriirnay dadka deegaanka, weydiinayna xog-celin meeshanu mudnaanta hagaajinta wado marista Seattle ku samaynlahayn.

Jawaabaha jaaliyadu waa ay cadayd, naguna hagtay inaanu diirada saarno:

- Waddooyinka isku xira qoysaska iyo carruurta dugsiyada
- Waddooyinka isku xira dadka si goobaha gaadiidka dadweynuhu istaago amase boosteejooyinka.

- Marshabiyoodiyada amase isgoysyada mashquulka ah (Halbowlayaasha)
- Wadooyinka xaafadaha (aan halbowle ahayn) halkaasoo aan lahayn dhabaha dadweynaha.
- Goobaha halkaasoo dadka lugaynaya lagu dhaawacay

ISBADALKAAN SAMAYNAY

Iyadoo loo eegayo rayi (fikir) celinta dadweynaha, waxaan qorshaynay/soo jeedinay dayactir toosa (oo ay ku jiraan marshabiyeedyada iyo dayactirka isgoysyada) wadooyinka Seattle ku wassoo u adeega sidii wado/dhabe dadku ku tagaan iskuulada amase boosteejooyinka gaadiidka.

Naqshada xaga kale waxay muujinaysaa

- Mudnaanta maalgalinta Qorshahaan "Priority Investment Network"

NOO SHEEG WAXAY KULA TAHAY!

Nasii fikirkaaga! Akhri qorshaha oo aanu ogaano

- Hadaanu diirada saarnay waxa saxa ah-u marista iskuulada iyo boosteejooyinka?
- Miyaad wax kabadali lahayd qayb ka mida qorshahan? Waa maxay sababtu? Waa maxay dariiqaad dooran lahayd?
- Miyay jiraan qorshayaal dheeraada oo aanu u baahanahay inaanu ka fiirsano

Dibu eegista qabya qoraalka waxaa lahayd heli karaa dhamaan maktabooyinka (Libraries) iyo barta internetka. Booqo www.seattle.gov/transportation/pedMasterPlan.htm.

Ku soo dir fikirkaaga PMPupdate@seattle.gov ka hor intaysan dhamaan waqtiga fikirka dadweynaha oo ku eg August 22, 2016



Waa sharci in laga istaago dadka lugeynaya oo taagan isgoysyada haday calaamaysan tahay amase yeysan lahayn calaamad




Seattle waa kaalinta 5aad magaalooyinka waaweyn oo dadku u lugeeyaan shaqada







Seattle waxay leedahay in kabadan 650 jaranjarooyin dadku maraan

Fikirka dadweynahay baa hagay abuurista Maalgashiga Qorshahan Mudnaantiisa "Priority Investment Network" halkaasoo aanu abaarayno maalgashiga lugeynta bulshada labaatanka sano oo soo socda



PMP: Mudnaanta maalgalinta Qorshahaan (PIN)

-  PIN Wadooyinka mashquula (halboolayaal)
-  PIN Wadooyinka xaafadaha (aan halboole ahayn)
-  PIN Wadooyin mashquula oo aan lahayn marshabiyeeri
-  PIN Wadooyinka xaafadaha oo aan lahay marshabiyeeri

Ilyadoo la eegayo Xogta Maamulka Hantida ee SDOT. Dhamaan goobaha maahan kuwa u muuqda ama ku haboon marshabiyeeriyo cusub

